

Isbeddel lagu sameeyay shuruudaha tallaalka Tdap (teetanada, gawracatada, iyo xiiqdheerta) ee Colorado sannad-dugsiyeedka 2026-2027

Waalidiinta ama mas'uuliyiinta qaaliga ah ee ardayda fasalka lixaad ama toddobaad,

Laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 2026-2027, sharciga Colorado wuxuu uga baahan doonaa ardayda inay helaan qiyaasta tallaalka Tdap **kahor maalinta ugu horraysa fasalka toddobaad**. Tani waa isbeddel la sameeyay sannad-dugsiyeedka 2025-2026 iyo kahor, iyadoo sharciga Colorado uu waajibiyay qiyaasta tallaalka Tdap kahor maalinta koowaad ee fasalka lixaad.

Maxaa la iiga baahan yahay inaan sameeyo isbeddelkani awgiis?

Haddii aad leedahay arday galaya fasalka toddobaad sannad-dugsiyeedka 2026-2027, lagaagama baahna inaad wax samayso haddii dugsiga ardaygaagu uu hayo **hal** fayl oo ka mid ah kuwani soo socda:

1. Diiwaanka tallaalka oo muujinaya in ardaygaagu u kol hore qaatay qiyaasta tallaalka Tdap ee loogu talagalay dhallinta markay ahayd ama kadib dhalashadooda 10aad.
2. Qorshe socda, oo uu saxiixay bixiyaha daryeelka caafimaadka ee ilmahaaga, kaasoo muujinaya in ilmahaagu uu la qabsanayo tallaalkada isxigxiga ee teetanada, gawracatada, iyo xiiqdheerta.
3. Shahaadada Dhammaystiran ee Ka-Dhaafidda Caafimaadka ama Ka-Dhaafida Aan Caafimaadka ahayn ee tallaalka Tdap.

Dugsiga ardaygaygu ma hayo dukumentiyadani. Maxaan ubaahanahay inaan sameeyo?

Tallaalka Tdap ayaa lagula talinayaa dhallinta da'doodu u dhaxayso 11-12 sano jir waxaana waajib ka dhigaya sharciga Colorado kahor inta aysan gelin fasalka toddobaad, laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 2026-2027.

Kahor maalinta koowaad ee ardaygaagu galayo fasalka toddobaad, dugsigoodu wuxuu uga baahan doonaa:

- Diiwaanka tallaalka oo muujinaya in ardaygaagu qaatay qiyaasta tallaalka Tdap ee loogu talagalay dhallinta markay ahayd ama kadib dhalashadooda 10aad. Tallaalkada waxaa looga heli karaa [lacag la'aan ama kharash yar Colorado oo dhan](#), ama
- Qorshe socda ([tusaalaha](#)) oo uu saxiixay bixiyaha daryeelka caafimaadka ee ardaygaaga oo muujinaya in ardaygaagu uu ku jiro geedi-socodka qaadashada dhammaan tallaalkada teetanada, gawracatada, iyo xiiqdheerta, kadib muddada ugu yar ee u dhaxaysa qiyaasaha lagu sharraxay jadwalka qaadashada dhammaan tallaalkada, ama
- Shahaadada Ka-Dhaafidda Caafimaadka ama Ka-Dhaafidda Aan Caafimaadka Ahayn, oo dhammaystiran oo leh tallaalka Tdap ee la xushay, iyadoo la adeegsanayo [qorsaha socda ee Colorado](#) oo lagu diiwaangeliyey foomamka Colorado.

Ardayda aan u hoggaansamin shuruudaha tallaalka Colorado waa in laga reebaa tallaalka

sida ku xusan xeerka Guddiga Caafimaadka ee Colorado ee 6 CCR 1009-2.

Haddii aad u baahantahay in lagaa caawiyo helidda tallaaf lacag la'aan ah ama qiimo jaban, booqo COVax4Kids.org, la xirii [hay'adda caafimaadka dadweynaha ee deegaankaaga](#), ama garaac [2-1-1](#) si aad u hesho macluumaad ku saabsan Health First Colorado iyo tallaafada laga helo aagaaga.

Ogow wax badan oo ku saabsan [Gawracatada, teetanada iyo xiiqdheerta: Cudurrada iyo tallaafada](#).

Ma qabtaa su'aalo? La xirii daryeelaha caafimaadka ilmahaaga ama [hay'adda caafimaadka dadweynaha ee deegaanka](#).